# Talo iyo kaalmo

– Xafiiska daryeelka shaqsiga iyo qoyska oo degmada Norsjö



NORSJÖ
kommun

*Adiga waxaa la soo xiriirkarta xafiiska IFO sidaa u heshid tal iyo kaalmo. Xafiiska daryeelka shaqsiga iyo qoysaska[Individ- och familjeomsorgen], IFO, oo shaqadiisa tahay inuu kaalmeeyo iyo caawiyo carruurta, dhallinyarada, dadka weeyn, qoysaska iyo ehelka baahida u qabo. Meheradan ujeedkeeda kale waa ka hortagid ahaan oo ujeedka yahay fiicneysiinta caafimaadka carruurta, dhallinyarada iyo dadka weeyn oo degmada ku nool. Haddii adiga aad dooneysid inaa su'aal na weeydiisid ama baahi u qabtid in lagu kaalmeyo waxaad la soo xiriirikarta IFO sidaa u heshid warbixin kale, talo iyo kaalmo ama sida codsi usoo gudbisan kartid.*

*Qofkii la soo xiriiro oo dooni talo iyo kaalmo ama warbixin kale, micnaha ma ahan in taas kuwgeed baaritaan loo bilaabi. Markuu qofka codsi soo gudbisado baa la bilaabi baaritaan iyo anaga waxaa u baahanahay inaa xaalada noloshadaada warbixin kale ka helno sidaa u qiimeynkarno kaalmada adiga kugu habboonaan laheed. Waxaa xita suurtagal ah inaa la kulmi kartid shaqaalaha qofka shaqsiga kaalmeeyo[socialpedagog] ilaa saddex jeer adigoo shaqaalaha bulsho u adeegida[socialsekreterare] wax go'aan kaa gaarin.*

*Dhammaadka warqadan warbixinta waxaa xita adiga ka heli warbixin kooban oo quseyso xafiisyo kale oo ku shaqo laheen xafiiska IFO.*

*Haddii aad dooneysid inaa su'aalo na weeydiisid ama codsi soo gudbisid fadlan la soo xiriir IFO oo soo wac telefoon lambarka guud oo degmada 0918-14 000. Warbixin kale waxaad ka heli bogga internetka oo degmada.*



# Adeegyada ey bixiso IFO

## Ilbaab furan

Kaalmeyn wada hadal oo dhowr nooc oo quseeyo waalidnimada iyo balwad isticmaalida oo la yeelan shaqaalaha qofka shaqsiga kaalmeeyo (ilaa saddex kulan oo wada hadlid) adigoo markas shaqaalaha bulsho u adeegida u baahneen iney go'aan gaaran. Wada hadalka waa bilaash, waxaa qaban sharciga sirta iyo wax qoraal oo la diwaangalin ma laga suubin. Wada hadalka waxaa lagu waafajin baahidaada/waxa adiga dooneysid iyo telefoon ahaan waa lagu suubinkara ama lagu qaban kara aqalka degmada. Toos ula soo xiriir shaqaalaha [socialpedagog] sidaa ballan wakhti uga suubsatid. Ilbaabka furan wuxuu xita quseeya ehelkaada.

## Kaalmeynta oo wada hadalka

Adiga oo baahi u qabo inaa heshid qof cilmi leh oo kala hadashid arrimaha balwad isticmaalida iyo caafimaad darada qalbiga. Kaalmadaan waxaa heli karo adiga ehelka ah.

## Kaalmeynta waalidka

Waa kaalmo quseyso adiga waalidka ah sidaa canugaaga ugu suubin laheed xuduud iyo jidka ugu tilmaami laheed hab toosan iyo jeceel leh iyo adiga kaa kaalmeyn sidaa u fulin laheed baahida aasaasiga iyo dareenka canuga kuu qabo. Kaalmeynta waalidka waxaa ku heli karta gurigaada oo adiga iyo qoyskaada isla joogo oo tusaale ahaan markaa isla qorsheyneysiin cuntooyinka la soo iibin/xilliyada cuntada. Kaalmada waxaa la helikara xita wakhtiga aad isla joogtiin haddii aad dooneysiin.

## Cope

Waa waxbarasho waalidnimo oo qorsheysan oo lagu talagalay waalidka haysto carruur jiro 3-12 sano. Ujeedka sare waa in waalidka la baro farsamadii ey ku fahmi lahaayeen iyo uga ficil celin lahaayeen dabeecada carruurtooda ku dhaqmi. Kaalmadaan waxey ahaan karta mid shaqsi ahaan loo qaadan ama koox ahaan.

## FBT – Ka wada hadlida xaalada carruurta

Waxbarasho qorsheysan oo loogu talagalay waalidka oo looga wada hadli waalidnimada iyo xaalada carruurta markey waalidka cilmi nafsi ahaan u xanuunsanaayaan, mukhaadaraad isticmaali ama cudur saameyn leh ku dhaco (sida kaansarka ama cidid dhiig istaago). Ujeedka baa in markas kadib waalidka canugiisa arrinta kala hadlo.

## Wada hadal dhiiro galin

Wada hadalka dhiiro galinta wuxuu adiga kuu muujin fursadaha aad haysatid. Wada hadalka dhiiro galinta wuxuu xita xoojin aqoontaada, mas'uuliyad aadida iyo kuu fududeyn sidaa ku gaari laheed hadefyadaada.

## MI – Wada hadalka dhiirogalinta[Motiverande samtal]

MI waa hab loogu talagalay dhiirogalinta oo badalid daabeecad markey noqoto habka nolosha loo noolyahay oo sida camal arrimaha balwadaha oo waxaa heli wada hadal iyo warbixin.

## RePULSE

Nooc tababarid uu qofka ku fiicnaan inuu ficiladii koontaroolikaro iyo ku tababaran habka bulshada wax loola wadaago. Waxaa laga wardooni xaaladaha kala duwan iyo arrimo kala duwan lagu fikiri iyo dareenada imaankaro uu canuga/dhallinyarad/qofka dareemo karo inuu barto iyo ku fiicnaado siduu u xalinlahaa xaaladaha la midka ah.

## ÅP – Ka hortagida dib ugu noqoshada dambi

ÅP waa hab daryeelid oo loogu talagalay dhallinyarada iyo dadka weeyn oo balwad isticmaalid dhibka ku hayso sida camal khamriga, mukhaadaraadka, daawooyinka, tubaakada ama ciyaaraha. Daryeelka ÅP qofka waxaa loo siin qeyb kamid ah dib usoo tarbiyeenta iyo ka hortagida dib ugu noqoshada balwada iyo qofka siduu u koontarooli lahaa deggaankiisa, u xalinlahaa xaaladaha halista keeno iyo ficilo kale ku badalo isticmaalida mukhaadaraadka/khamriga iyo ciyaaraha. Barnaamishkan wuxuu ka koobanyahay 8-10 kulan.

## CRAFT

Barnaamishkan wuxuu quseeya ehelka iyo dadka la nool qof isticmaalo balwad. Dadka ka qeybqaatan waxey baran farsamooyin kala duwan ey ku badalikaran habka ey noloshooda tahay iyo ku kordhinkaran caafimaadkooda eysan ku xirneen haddii qofka ey la noolyahiin oo balwada isticmaalo xaaladiisa uu wax ka badalo ama uusan ka badalin. Barnaamishkan wuxuu ka koobanyahay 10-14 kulan iyo quseeya dadka ka 18 sano.

## Xoog u sheegashada qofka nolosha la wadaagtid

Xoog u sheegasho waxaa laga wadaa jir dil, af lagaadeyn, galmo, hanti ama dhaqaalo baahi u qabid.  IFO weey caawisa dadka loo xoog sheegto da kasto ey jiran oo la nool ama la noolaan jiray qof jir dili jiray, u hanjabi jiray, sharrafta ka ridi jiray, af lagaadeyn jiray ama si kale oo qaldan ula dhaqmi jiray. Dadka oo xoog sheegashada adeegsado ayaga xita weey heli karan caawinaad iyo daryeelid ey ka heli karan IFO (shaqsi ahaan) ama Goobta raga[Centrum för män] (shaqsi ahaan iyo koox ahaan) oo Skellefteå.

## ATV – sida la suubin haddii xoog la sheegan

Hadefka wada hadalka waa in qofka xoog sheegashada adeegsan joojiyo inuu xoog u sheegto qofka uu la nool yahay. Waxyaabaha laga wada hadli waxaa kamid ah mas'uuliyada, cawaaqibyada iyo fahantid inaa xoog adeegsaneysid iyo waxaa ku badalikartid xoog sheegashada.

## Trappan

Nooc daryeelid oo quseeyo la hadlida carruurta xaaladaha degdega oo canug marqaati ka ahaa xoog sheegasho qoyskii ka dhex dhaco ama canug loo geysto xoog sheegasho.

## Aniga waa awooda

Hab qaas kaalmo oo bari carruurta jiro 5-12 sano sidey u xalin lahaayeen iyo uga gudbi lahaayeen xaaladaha adag.

## Kaalmeynta guri u adeegida[Boendestöd]

Kaalmeynta guri u adeegida waxey quseysa qofka jiro 18 sano ama ka weeyn oo cilmi nafsi ahaan curyaan ah ama isku darsaday cilmi nafsi curyaanimo iyo balwad isticmaalid. Ujeedka oo kaalmeynta guri u adeegida baa ah dhiirogalin iyo qofka helo xalal kala duwan oo noloshiisa u fududeeyo. Hadefka shishe oo kaalmeynta guri u adeegida baa ah qofka inuu noqdo qof isku filan ilaa intii suurtagal ah.

## ESL – nolol aad isku filan tahay

Inta qofka helin caawinada kaalmeynta guri u adeegida qofka waxaa loo sii oggolaankara wakhtiga ESL. ESL waa hab farsamo oo qofka sida wax loo baro ku saabsan oo qofka daryeel ahaan loo siin oo hadefyo buu leeyahay oo waxaa loo isticmaalikara shaqsi ahaan ama koox ahaan.

## Wada hadalka wada shaqeynta

Wada hadalka wada shaqeynt waa fursad ey waalidka kala tagay isku af garan sida ey ka yeeli lahaayeen mas'uuliyada waalidnimada, guriga canuga ku noolan iyo wakhti la qaadashada canuga. Ujeedka waa sidee uga wada shaqeynaa danta canuga.

## Qof qaas[kontaktperson] iyo qoys qaas[kontaktfamilj]

Qof qaas waxaa laga qof adiga kaa kaalmeeyo iyo talo kaa siiyo xaaladaha nolol maalmeedka iyo kaa caawiyo inaa cidlo ku noolaan oo xilliyada firaaqada aad tahay waxyaabo kala duwan kula suubiyo. Qoys qaas waa kaalmo la siiyo qoysaska carruurta haaysto qaarkood. Taas micnaheeda noqon karta in canuga dhowr maalmood bishiiba qoyska qaaska la noolan. Qoyska qaaska waa kaalmo aad loo xiiseyo iyo waxey ka mid tahay shaqooyinka ka hortagid ahaan xafiiska bulsho u adeegida[socialtjänsten] suubiyo. Dhammaan dadka oo haysto qoyska qaaska ayaga baa dalbadeen in kaalmadas la siiyo.

## Kaalmeynta dhaqaalaha[Ekonomiskt stöd]

Haddii adiga aadan haysan dhaqaalo kugu filan adiga waxaa soo codsankarta kaalmeynta dhaqaalaha oo xafiiska IFO. Meeshas waxaa

adiga ka heli caawinaad sidaa xiriir ula yeelankartid shaqaalaha miisaniyad suubinta iyo talo bixinta deynta oo Skellefteå. Warbixin kale ka akhriso bogga internetka oo degmada Norsjö.

## LSS

Adiga waxaa haysata fursad aad degmada ka codsankartid caawinaada sida ku qoran sharciga kaalmeynt iyo u adeegida curyaamiinta qaarkood[lag om stöd och service för vissa funktionshindrade], LSS. LSS wuxuu kamid yahay sharciyada xaqa oo waxaa la ballan qaadi in dadka aad curyaanka u eh iney helan nolol wanaagsan, ey helan caawinaada ey u baahanyahiin markey noqoto nolol maalmeedkooda iyo iney ayaga saameyn ku yeelankaran nooca kaalmada la siin iyo adeega la siin. Hadefka waa in qofka shaqsiga helo fursad uu u noolankaro sida dadka kale camal.

## Ka caawinaada howsha guriga[Hemtjänst]

Ujeedka ka caawinaada howsha guriga baa ah adiga oo jiran ama curyaanka ah laguu fududeeyo nolol maalmeedka, awoodaada la xoojiyo iyo ilaa intii suurtagal ah aad ku noolaatid gurigaada.

*Haddii adeegyadan furan eysan qofka ku filneen waxaa suurtagal ah qofka inuu heli karo caawinaad kala duwan oo meelkale ku noolaado. Meelahaas waxa ey yahiin kuma qorna warqadan warbixinta.*

# Talooyinkale oo ka baxsan IFO

## ABC – Dhammaan carruurta waa muhiim[Alla barn i centrum]

Kaalmadaan waxey quseysaa waalidka haysto carruur jiro 3-12 sano. ABC waxey ka koobantahay afar koox kulan oo kulankasto wuxuu ku saabsanyahay mawduuc. Kulanadaan qofka wuxuu heli fursad uu waalidiin kale kala wada xaajoodo waalidnimada. Mawduucyada waxey ku saabsanyahiin sida waalidka u badin karan canuga inuu isku kalsoonaado iyo habka ey wada xiriirkooda u xoojin lahaayeen. Koox ahaan kugu martiqaadi sanadkasto guddiga caafimaadka bulshada[folkhälsorådet] oo Norsjö.

## Dhallinyaradii aan jecelnahay laakiin kadeedka isku badalay

Kaalmadaan waxey quseysaa waalidka haysto carruur jiro 13-17 sano. Waxaa la iskugu imaan afar kulan oo looga wada hadli xaalado kala duwan oo nolosha nolol maalmeedka ey la kulman waalidiinta haysto carruur dhallinyaronimo gaaray. Koox ahaan kugu martiqaadi sanadkasto guddiga caafimaadka bulshada oo Norsjö.

## Cope oo koox ahaan

Waa waxbarasho quseyso waalidiinta haysto carruur jiro 3-12 sano. Ujeedka baa ah in la siiyo waalidiinta farsamooyin ey ku fahmaan iyo ficil cilin ey ka

suubin dabeecada canuga ku dhaqmi. Koox ahaan kugu martiqaadi sanadkasto guddiga caafimaadka bulshada oo Norsjö.

## Shaqsi wakiil ka noqon[Personligt ombud]

Shaqsi wakiil ka noqon waa qof adiga kuu hadli oo dadka cilmi nafsi ahaan curyaanka ah. Xafiis naga madax bannaan oo anaga nagu shaqo laheen. Shaqsi wakiil kaa noqdo waa arrin aad u madax bannaan tahay iyo waa bilaash oo qofka ma u baahna in loo gudbiyo. Warbixin kale waxaad ka heli bogga internetka oo degmada Norsjö iyo bogga gobalka Västerbotten www.povasterbotten.se.

## Kaalmeynt ehelka, xuleys ka qaadida

Waxaa jiro fursad ey ehelka helikaran kaalmo oo ey la kulmikaran ehelkale iyo ka qeybqaadankaran dhaqdhaqaaqyo kala duwan oo quseyo dadka ehelkooda daryeelo iyo telefoonka kala soo xiriirikarta sidaa u heshid talo iyo kaalmo.
Waxaa xita jiro kaalmo u baahan in la go'aamiyo in lagu siiyo. Warbixin dheeri ka akhriso bogga internetka oo degmada Norsjö.

## Wakiilka sharciyeysan, qofkale oo mas'uul kaa noqo

Wakiilka sharciyeysan ama qofka mas'uulka kaa noqon wuxuu kaa caawin dhaqaalaha, xuquuqdaada buu kuu dhowri ama si kale kuu kaalmeyn nolol maalmeedka. Warbixin kale ka akhriso bogga internetka oo degmada.

## Talo siinta qoyska[Familjerådgivning]

Labo qof oo isla nool, qoysaska iyo qof shaqsi ayaga baa iskood soo raadsankaran xafiiska talo siinta qoysaska oo Skellefteå. Kharashka talo siinta qoysaska waa 50 kr qofkiiba iyo halkii marba. Warbixin kale ka akhriso bogga internetka degmada Skellefteå.

## Talo bixiye Oden

Talo bixiye Oden oo Skellefteå wuxuu ku shaqo leeyahay arrimaha khamriga, mukhaadaraadka iyo balwada ciyaaraha. Ehelka xita weey la xiriirikaran meeshas. Shaqaalaha aqoon dheer bey u leeyahiin, sharciga sirta baa qaban iyo kulanka booqashada waa bilaash.Warbixin kale ka akhriso bogga internetka oo degmada Skellefteå.

## FMN – waalidiinta ka soo horjeedo mukhaadaraadka

Ururka waalidiinta oo la dhaho Föräldraföreningen Mot Narkotika waa urur samafal, oo ka madax bannaan diin, siyaasad, oo ujeedkiisa gacanta koowad ey tahay ehelka – waalidka, walaalaha iyo qaraabada kale oo dooni kaalmo iney ka helan qof xaaladan camal soo martay. Norsjö waxey leedahay koox isla xiriiro oo haddii aad dooneysid la xiriirikartid. Warbixin kale ka akhriso bogga internetka oo ururka FMN.

## La soo xiriir IFO:

Haddii aad dooneysid inaa shaqaalaha la soo xiriirtid waxaad soo wici lambarka guud oo degmada 0918-140 00. Warbixin ku saabsan saacadaha telefoonka waxaad ka heli telefoonka guud.

**Ilbaabka furan**

Haddii aad xiiseyneysid ”ilbaabka furan”[”öppen ingång”] toos ula xiriir Emma Viklund, shaqaalaha waxbaradi bulshada, telefoonka 0918-140 00 ama e-mail usoo dir: emma.viklund@norsjo.se



NORSJÖ kommun

Ciwaanka booqashada: Storgatan 67
Ciwaanka bostada: 935 81, Norsjö
Telefoonka: 0918-140 00
E-mailka: info@norsjo.se
Bogga: www.norsjo.se